

مسارات
خيرية

CHARITABLE
PATHS

July (35) Apr 2024



MUSTAQBAL REJO LEH

KOBCINTA DHAQAALAH BULSHADA GEESA

AFRIKABULSHADA





04



XOOJINTA
DHAQAALAHA



03



MASHAARIICDA
DHISMAHA



05



MASHAARIICDA
ARRIMAHA BULSHADA



06



MASHAARIICDA
XOOGSI XALAAL AH



A.R.C

Address: Barbera Road - Hargeisa

Mobile: +252633278256

Phone: +252514333

E-Mail:

Website: www.arcsom.org

مسارات
خيرية CHARITABLE
PATHS

WAA DHANBAAL BILLE AH OO
HAYADDA GARGAARKA AFRICA
(A.R.C) AY KAGA WARRANTO
MASHAARIICDEEDA HORUMARINEED
IYO BANI-AADAMNIMO .

JULY (35) JULY 2024



جمعية الرحمة العالمية
Rahma International Society



MASHAARIICDA DHISMAHA



ARC OO MASAAJID CUSUB KA DHISTAY MAGAALADA KISMAAYO

ARC ayaa Masaajid cusub ka hirgelisay magaalada Kismaayo ee xarunta dawladgobaleedka Jubaland. Masaajidkan oo ay halkii mar ku tukaan karaan 116 ruux, waxa kale oo la socda kaabayaasha muhiimka u ah masaajidka oo ay ka mid yihiin, xamaamyada iyo qaybta weysada, kaydka biyaha, gogosha iyo nidaamka cod baahinta oo dhammaystiran.

Masaajidkani waxa uu qayb ka yahay dadaallada ay ARC geliso dhismaha xarumaha dhaqanka iyo Barashada diinta oo kaalin weyn ka qaata isdhexgalka, iskaashiga iyo amniga xaafadda uu ku yaallo.

Masaajidkan waxaa maalgeliyey qoys u dhashay dala Kuweyt oo soo mariyey hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA oo xarunteedu ay tahay dalka Kuweyt.





MUSTAQBAL REJO LEH

KOBCINTA DHAQAALHA BULSHADA GEESA

AFRIKABULSHADA

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) waxaa ka go'an oofinta yoolkeeda ah in la ilaaliyo, la daryeelo, korna loo qaado noloshu bulshada Soomaaliyeed ee gobalka Geeska Afrika.

Waxa aannu si firfircoon u sii kordhinnaa mashaariicdayada la xidhiidha kobaca dhaqaalaha, isku filnaanta bulshada iyo ka maaranka ku tiirsanaanta kaalmada dibadda.

Waxaa ka mid ah dhiirrigelinta xirfad abuurka dhalinyarada, xoolaynta iyo maalgelinta ganacsiyada yaryar si loo dhiirrigeliyo waxsoosaarka bulshada, loona abuura ilo dakhli oo qofku noloshiisa ku filnaan karo, taas oo ah jidka ugu habboon ee saboolnimada lagula dagaalami karo.

Mashaariicdan waasigaarahugafaa'idaysta

bulshada nugul, iyo dhalinyarada, kuwaas oo hela fursado dhaqaale abuur oo ay ula siman yihiin bulshada inteeda kale, iyo haweenka oo ah laf dhabarta dhaqaalaha qoyska Soomaalida oo lagu dhiirrigeliyo kaalintooda wax ku oolka ah, lana xoojiyo fursadaha ay dakhli ku samayn karaan.

Annaga oo aaminsan in wadajirka iyo iskaashigu ay yihiin kaalin weyn ka geysan kara dadaal kasta oo lagu abuurayo Geeska Afrika oo ku naalooda cadaalad bulsho, barwaaqo iyo badhaadhe dhaqaale.

Waxa aannu mar kasta bogaadinaynaa deeqbixiyeyaasha iyo ururrada jaalka nala ah ee taageerada aan kala joogsi lahayn nagula garab taagan, rumaynta himiladayada bulsho ee muhiimka ah.



ARC Oo Dharka Ciidsiisay Carruur Ka Soo Jeedda Qoysas Danyar Ah



Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa ciidsiisay 81 ka mid ah carruurta agoonta ah ee wax ka barta dugsiyada magaalada Muqdisho, caasimadda Soomaaliya.

Dr. Maxamed Cali Geelle, madaxa xafiiska Muqdisho ee ARC oo ka hadlay munaasabadda carrurta lagu guddoonsiinayey dharka Ciidda, ayaa bogaadiyey hawshan samafal ee lagu xoojinayo farxad gelinta agoonta, gaar ahaan maalmahan muhiimka u ah Muslimiinta oo dhan. Isaga oo hoosta ka xariiqay in yoolka mashruuca ciidsiinta

agoonta laga leeyahay uu yahay in aanay ka hadhin farxadda, iyo damaashaada maalmahan oo kale ay Muslimiinta oo dhammi ku damaashaadayaan. Dr. Geelle waxa uu u mahadnaqay hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA oo maalgelisay mashruucan samafal oo qayb ka ah Barnaamijyada arrimaha bulshada, iyo bani'aadamnimada ee ay ARC ka waddo dhulka Soomaalida, kuwaas oo ujeeddadoodu ay tahay in la xoojiyo bulshada qaybaheeda taagta daran, gaar ahaan munaasabadaha gaarka ah, sida ciidamada, iwm.



MASHAARIICDA ARRIMAHA BULSHADA



ARC Oo Xoolo Dhaqasho Ah Ugu Deeqday Qoysas Xooluhu Ka Baxeen



ARC ayaa magaalooyinka Hargeysa iyo Boorama ee Somaliland ka fulisay Mashruuc xoolayn ah oo ay ka faa'idaysteen qoysas ay xooluhu ka baxeen. Xoolahan ayaa loogu talagalay dhaqasho, si ay qoysku uga faa'idaystaan caanaha iyo subaga, sida oo kalana u dhaqaadan tarantooda.

Mashruucani waxa uu qayb ka yahay Barnaamijka 'Xoogsi xalaal ah' oo ay hay'adda ARC ka fuliso dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika, kaas oo ay ujeeddadiisu tahay in qoysaska danyarta ah iyo dhalinyarada hal-abuurka leh loo abuuro ilo dakhli ay ka soo saaraan nolol maalmeedka iyaga iyo qoysaska ku tiirsan.

Waa dadaal la doonayo in lagu dhimo ku tiirsanaanta kaalmada bani'aadamnimo ee dibadda, lagana qayb qaato joogtaynta kobaca dhaqaalaha bulshada.

Barnaamijka 'Xoogsi xalaal ah' waxaa ka mid ah xoolaynta, waxbarashada farsamada gacanta, xirfado la baro dhalinyarada, kuwaas oo ay ka mid yihiin dawaarka iyo tolmaaha dharka ee haweenka iyo beer falidda. Mar ay tababarrada iyo waxbarashada dhammaystaanna waxaa loogu deeqo qalabka farsamadaas si ay suuqa shaqada ugu galaan, iyo sida oo kale maalgelinta ganacsiyada yaryar.





@africanreliefco



Address: Barbera Road - Hargisa

Mobile: +252633278256

Phone: +252514333

E-Mail: somalia office1@gmail.com

Website: www.arcsom.org

